# Markhaatiyada dhalinyarada iyo waaladiintooda, daryeelayaasha, qoyska iyo whānau

## DHEX SOCDA NIDAAMKA CADAALADA DENBIILAHA WAXA DHACO IYO SIDA LOO HELO TAAGEERADA

Markhaatiyaasha waa qayb aad muhiim u ah oo kamid ah nidaamka caddaalada dambiile ee New Zealand. Waxay bixiyaan caddayn lagama-maarmaan u ah baaritaanka dambiga iyo dacwadaha maxkamada caawimaadana waxay xaqiijinaysaa in dadka saxda ah loo qabto si loogu la xisaabtamo dambiyadda ay galeen.

Waa muhiim in aad heshid taageerada adiga kugu habboon. Waxaa jira hay'ada aagaaga ah oo ku siin karo khabiirka dareenka iyo taageero wax ku ool ah. Soo wac Khadka Macluuumaakda Dhibanayaasha 0800 650 654 si aad u ogaato hay'adaha kuu dhaw.

*Fadlan eeg dhammaadka warqaddan xogta ah oo xiriirada ugu muhiimsan ah iyo qaamuuska.*

## Xuquuqda dhibanaha

Dhibanayaasha dambiga ee New Zealand waxay leeyihiin xaquuq. Hadii dhibanaha uu canug yahay ama qof yar, waalidkooda ama masuulka sharciga waxay leeyihiin isku xaqa sida dhinabaha.

Waxaad xaq uleedahay in laguu sheego adeegyada ku caawin karo, in la joogteeyo wargelinta horumarka dacwada ilaa maxkamadda iyo in aad ogaatid waxa la filanayo goortii aad maxkamadda aadid.

Waxaad xaq u leedahay in aad u sheegtid maxkamadda sida dambiga uu kuu saameeyay. Hadii aad tahay dhibanaha dambiga canug ama qof yar, waxaad xaq u leedahay in aad ka soo qeybgashid shirka kooxda qoyska iyo in aad dhahdid waxa aad jeclaan laheyd in aad aragtid in ay dhacaan.

Xaaladaha qaar, adiga ama wakiilkaaga wuxuu xaq uleeyahay in uu hadal ka dhaho waxyaabaha sida magaca xakameynta, damaanada, xabsiga guriga ama cafiska.

Waxaad ka filan kartaa edeb, naxariis iyo adeegyo ixtiraam leh saraakiisha maxkamadda, booliska iyo qof walboo kale oo kulug leh dacwada. Waxaad xaq u leedaahay arimaha gaarka ah.

Akhri Xeerka Dhibanaha oo warbixinta dheeraadta ah oo ku saabsan xaquuqdaada iyo daaweynta aad fillan kartid. Waxay ku jirtaa websaydkeena ee victimsinfo.govt.nz iyo xog kale oo waxtar leh.

Haddii aad u maleysay in aan xaquuqdaada la buuxin, ama aadan helin heerka adeegyada aad filaneysid, waxaad sameyn kartaa cabasho. Booqo victimsinfo.govt.nz ama soo wac Khadka Macluuumaakda Dhibanayaasha 0800 650 654.

## Baaritaanka

Marka dambi laga warbixiyo, sarkaal boolis ah ayaa loo xilsaarayaa dacwada. Sarkaal u xilsaaran ayaa kula hadlayo adiga iyo waalidkaaga ama daryeel bixiyaha oo kuu sheegayo qofka aad kala hadli kartid taageero.

Sarkaalka wuxuu kaloo kaala hadlayaa wixii arrimo amni ah adiga iyo sida loola macaamilayo kuwaan.

### WAREYSIGA

Sida ugu dhaqsiha badan oo suurtogalka ah markii dambiga la soo wargeliyo, booliska wuxuu u baahanayaa in uu ku wareysto adiga iyo uu qaado warbixintaada. Nooca dambiga uu yahay waxaa uu go'aaminayaa sida wareysigu u dhacayo. Sarkaalka u xilsaaran ayaa kuu sharaxayo middaan.

Warbixintaada waala duubi karaa ama wuxuu noqon karaa warbixin qoran. Waxaa lagu siinayaa koobi warbixintaada oo qoran. Xitaa inkastoo aad sameysay warbixinta, weli waxaa lagaa rabaa in aad ka jawaabtid su'aalaha maxkamadda.

Waa muhiim in aad ku sheegtid erayadaada waxa dhacay, marka waa in aad isku daydaa in aadan kala hadadlin qoyskaaga iyo whānau iyo dadka kale dambiga wareysiga ka hor.

Wareystayaasha marwalba waxay ku dadaalaan in ay hubiyaan in aad u baahato kaliya in aad sameysid hal wareysi kaliya, laakin mararka qaar waxaa laga yaabaa in aad u baahato in aad sameysid mid kale.

Inta lagu guda jiro baaritaanka, booliska waxay sidoo kale la hadlayaan markhaatiyaasha kale oo waxay soo ururineyaan caddaynta. Haddii ay hellaan caddayn ku filan waxay soo Qabanayaan qof kaddibna waxay ku soo oogayaan dambi.

#### DAMAANADA

Marka la xiro qof, waxaa laga yaabaa in ay diraan ilaa ay maxkamadda ka aadaan. Tan waxaa lagu magacaabaa - damiin. Mararka qaar waxaa jiro xaalado ku saabsan halka qof uu ku noolaanayo iyo waqtiga ah in ay guriga imaadaan. Haddii booliska u maleeyo in adiga ama dad kale oo bulshadda ka mid ah ay halis ku jiraan, qofka laga yaabo in xabsi lagu hayo ilaa ay maxkamada ka aadaan, goorta ay weydiisan karaan damiin mar labaad ah.

Hadii aad dhibane tahay oo dambi halis ah, adiga iyo waalidkaaga ama daryeel siiyaha ayaa la weydiinayaa sida aad u dareentay qofka helaya damaanada iyo waxaa laguu sheegayaa haddii ay heleen iyo hadii kale. (Qaamuuska dhammaaadka warqaddan xogta waxay sheegaysaa waxa dambiga halista uu yahay.)

Waalidkaada ama daryeel siiyaha waxaa sidoo kale la weydiinayaa haddii ay rabaan in ay qayb ka noqdaan diiwaanka wargelinta dhibanaha si markaas laguugu sheego waxa ku dhaco dambiilaha markii la xukumo kadib. Waxaad iska diiwaangelin kartaa naftaada marka aad gaartid 17. Si aad u baratid wax badan, buugaagta kale iyo waraaqaha victimsinfo.govt.nz

#### WARBIXINTA SAAMAYNTA DHIBANAHA

Haddii aad tahay dhibane dambi, adiga iyo waalidkaaga ama daryeel siiyaha waxaa la weydiinayaa haddii aad rabtid in aad sameysid warbixinta saameynta dhibanaha. Tani waxay maxkamadda u sheegeysaa sida dambiga uu kuu saameeyay. Sarkaalka ee ka masuulk ah, Taageerada Dhibanaha ama hay'ada taageerada ayaa kaa caawin karta warbixintan.

> Mararka qaarkood, dhib ma leh ilaa inta lagu jiro baaritaanka, ma jirto caddayn ku filan oo lagu xidhi karo ama dacwada maxkamad loogu qaado. Tan macnaheedu maaha in aan lagu rumaysan.

## Taageerada

Waxaad heli kartaa taageerada marka dacwadaada la baarayo. Adiga ama waalidkaada ama daryeel siiyaha waxaad soo wici kartaan Khadka Macluuumaakda Dhibanayaasha 0800 650 654 si aad u ogaatid hay'adaha taageerada gaarka ah ee aagaaga. Ama waxaad soo wici kartaa Taageerada Dhibanaha 0800 842 846 – Taageerada Dhibanaha wuxuu siin karaa taageero dhammaan markhaatiyada xeer ilaaliyaha iyo dadka taageerayo iyaga.

#### SARKAALKA MAS'UULKA AH

Waxaad wici kartaa ama aad u diri kartaa email sarkaalka booliska ee mas'uulka ah wakhti kasta si aad u ogaatid waxa ku dhacay kiiska.

#### LATALIYAHA DHIBANAHA MAXKAMADDA

Haddii aad tahay dhibane dambiile, La taliyaha dhibanaha maxkamadda ayaa kula soo xiriiriya ka dib marka eedeysanahu uu maxkamadda aado marka hore.

Waa shaqadooda in ay kuu sheegaan waxa ku dhacayo dacwadaada iyo waxa aad sameyn kartid. Waxay sidoo kale kuu sheegi karaan meesha laga helo taagero dhaqaale iyo taageera niyadeed. Buug yaraha adeegyada Maxkamadda ee dhibanayaasha wuxuu leeyahay xog badan oo ku saabsan adeegyada.

Waad la xiriiri kartaa si toos ah lataliyahaaga dhibanaha maxkamada ama adoo u sii maraya Khadka Macluuumaakda Dhibanayaasha 0800 650 654.

#### ILAHA MARKHAATIYAASHA DA'DA YAR

Markhaatiga yar waxay heli karaan illo sida jadwalada, boorar iyo buuggaagta oo lagu caawinayo fahamka nidaamka maxkamadda. Weydii la taliyaha dhibanaha maxkamadda ee aagaaga ilahaan.

#### TILMAAMAHA HAY'ADAHA DAWLADDA

Waxaa jira tilmaamaha hay'adaha dawladda kuwaas oo la shaqeynaya markhaatiga canuga iyo dadka taageerada u ah. Waxaad ka arki kartaa tilmaamahaan onleenka victimsinfo.govt.nz

#### TAAGEERADA LACAGEED

Deeqaha dhaqaalaha waxaa loo heli karaa dhibanayaasha dambiyada halistaha ku jira (qaamuuska dhammaadka buuggan wuxuu sheegayaa waxa dambiga halista uu yahay). Deeqahani waxay kaa caawin karaan in ay daaboolaaan kharashiyaadka lagula tacaalo saamaynada denbiga.

Si aad u ogaatid hadiiba aad heli kartid deeqaha dhaqaalaha iyo inta aad heli kartid, fadlan booqo victimsinfo.govt.nz ama ka soo wac Taageerada Dhibanaha 0800 842 846.

Marqaatiyada waxaa laga yaabaa in aysan u suurtagelin in ay sheegtaan qarashka maxkamadda. Weydii la taliyaha dhibanaha maxkamadda.

## Maxkamadda

Eedeysanaha (qofka dambiga lagu soo eedeeyay) waxaa laga yaabaa in uu Maxkamadda ka hor yimaado dhawr jeer, tusaale ahaan qirashada denbiga ama dambi la'aanta ama in garsooraha uu eego caddaynta dacwada.

Hadii qofka uu qirto dambiga, maalintaas ayaa la xukumayaa, ama taariikhda ama taariikh ayaa loo diyaarinayaa oo dhageysiga xukunka ah. Looma baahno in aad siiso cadeyn kale oo dheeraad ah.

Hadii eedeysanaha uu qirto in uu saqn dambiile aheyn, dacwada waxay aadeysaa maxkamadda iyo waxaad u baahaneysaa in aad caddayn bixisid sida marqaatiga (fiiri *marqaati Noqoshada*).

#### WAXBARASHO MAXKAMADDEED EE MARKHAATIGA DA'DA YAR

Dacwadaha maxkamadda way dheeraan kartaa oo way adkaan kartaa. Ma ahan sida telefishanka laga arko. Haddii ay tahay in aad caddayn bixisid, waxaad weydiin kartaa Maxkamadda Waxbarashadda ee Marqaatiga Dhalinyada ah. Waa barnaamijka uu bixiyo la taliyaha dhibanaha ee DHAMMAAN markhaatiyadda da'da yar ee gudaha maxkamaddaha dadka waaweyn (marka laga reebo eedaysaneyaasha). Markhaati kasta oo da'yar ama shakhsiga taageera waxay la xariiri karaan la taliyaha dhibanaha maxkamadda ee jooga maxkamadda si ay u weydiiyaan adeegaan.

Haddii aad markhaatiyaasha da'da yar aad u waydiisay waxbarasho maxkamaddeed, la taliyaha dhibanaha maxkamadda ayaa kula soo xiriiraya ku dhowaad saddex usbuuc ka hor inta uusan kiiska maxkamadda aadin. Waxay ku geynayaan adiga iyo walidkaaga ama daryeel siiyaha ilaa waxa ka dhaca maxkamadda, qofkee fariista meesha iyo qofkee qabta waxa. Waxay sidoo kale ku geyn karaan si aad u booqatid qolka maxkamadda laftiisa.

Waxaad la xiriiri kartaa la taliyaha dhibanaha maxkamadda ee aagaaga ah iyadoo la isticmaalayo Khadka Macluuumaakda Dhibanayaasha 0800 650 654.

#### DENBIYADA DHALINYARADA

Haddii uu dambiga uu sameeyay cunug ama qof da'yar, dhammaan nidaamka dacwada oo dhan waa mid ka duwan, sababtoo ah wuxuu aadayaa nidaamka caddaalada dhalinyaro. Tani waxaa ku lug lahaan kara shir kooxeed qoys. Haddii aan dhibane dambi tahay, waxaa lagaa marti qaadayaa shirka. Waxaad sidoo kale ka qeybgali kartaa dhageysiga Maxkamadda Dhalinyarada. Waxaad gayn kartaa dadka ku taageeraa shirka kooxda qoyska iyo ilaa maxkamadda.

Isu duwaha Cadaalada Dhalinyarada, kaas oo u shaqeeyo Carruurta, Dhalinyarada iyo Qoyska, waxay hubineysaa waad ogtahay waxa ku dhacayo dacwdada waxa aad u baahantahay in aad sameysid.

Qaar ka mid ah dacwadaha aadka halista u ah ayaa taga Maxkamadda Dhalinyarada iyadoo la raacayo nidaamka maxkamadda dadka waaweeyn.

## Marqaati noqoshada

Markhaatiyaasha aad ayay muhiim uga yihiin dacwada. Waxay sheegi karaan caddeyn muhiim ah oo waxa dhacay ah.

#### MAXKAMADDA KA HOR

Haddii laguugu baahdo sida markhaati, sarkaalka booliska ee u xilsaaran dacwada ama la taliyaha dhibanaha maxkamadda ayaa kuu sheegayo goortii aad u baahantahay in aad maxkamadda joogtid iyo meesha la aadayo. Sidoo kale waxaad heli doontaa wargelin rasmiya oo laguugu keeno guriga.

Inta aan dacwada laga maqlin maxkamada ka hor, sarkaalka u xilsaaran ayaa kula kulmayo adiga oo kuu shidaaya cajalad fiidiyow wareysigaaga ah si uu kuu xasuusiyo waxaad ka tiri wareysiga. Waxay sidoo kale kaala hadlayaan sida aad u sheegeysid caddeyntaada.

U sheeg sarkaalka u xilsaaran, la taliyaha dhibanahaa maxkamadaada ama shaqaalaha taageerada gaarkaaga ah haddii aad u baahantahay dhageysi, dhaqdhaqaaqa ama fasiraada luqadda ee caawinta maxkamadda.

BIXINTA CADDAYNTA

Sarkaalka booliska ee u xilsaaran dacwada ama La taliyaha dhibanaha maxkamaddaada ayaa kugula kulmi karo adiga iyo qoyskaaga iyo whānau maxkamadda ama banaanka guriga maxkamada. Waxay idin gaynayaan goobta sugitaanka oo gooni ah, si ay idin ka illaaliyaan la kulanka eedeysanaha ama dadka taageeraya iyaga. Laakiin waxaa laga yaabaa in aad wali ku aragtid gudaha maxkamadda iyo agagaarkeeda.

Markhaati ahaan, waxaa lagu waydiin doonaa su'aalo ku saabsan waxa dhacay ama waxaad ka og tahay denbiga.

Inta aadan sheegin caddeyntaada, waa in aad balanqaadaa in aad runta sheegeysid. Waxaad dooran kartaa in aad ku dhaarato (balanta diinta) ama in aad sameysid bayaan (aan aheyn balanta diinta).

Haddii wareysigaada ugu horeeyay uu ahaa cajalada fiidiyowga, sida caadiga ah maxkamadda ayaa laga shidayaa. Markaas kadib waxaa lagu weydiinayaa in aad ka jawaabtid su'aalo walba ee ka timid dacwad oogaha iyo qareenka eedeysanaha. Garsooraha laga yaabo in uu ku weydiiyo su'aalaha qaarkood.

War-baahin lama ogolo in lagu soo wargeliyo magaca markhaatiga dhalinyarada, ama wixii faahfaahin ah ee laga yaabo in lagu soo aqoonsaddo.

Amnigaagu waa muhiim Haddii waqti walba aad ka walaacsantahay amnigaada maxkamadda ah, la hadal sarkaal booliska ama sarkaalka amniga.


IKHTIYAARADA LAGU BIXINAYO CADDAYNTA

Waxaad heli kartaa waalidkaaga ama daryeelahaada ama qof ku taageera oo fadhiista dhinacaaga marka aad bixineysid caddeynta.

Waxaa jira sadex wado oo ugu muhiimsan oo aad marqaati ugu sheegi kartid maxkamadda: telefishin ay ku xidhantahay kamarada guriga lagu ilaaliyo, shaashada gadaasheeda, ama shaashad la'aan.



**Telifishan ay ku xidhantahay kamarada guriga lagu ilaaliyo** Waxaa kuu suurtogali karto in aad ceddeyntaada ka sheegtid khadka fiidiyowga oo qol gooni ah, marka ma aha in aad qolka maxkamadda ku jirtid. Waxaa kuu suurto galeyso in aad aragtid garsooraha iyo qareen walba marka ay ku weydiiyaan su'aalo laakin kuuma suurto galeyso in aad aragtid qofkale.



**Shaashada gadaasheeda** Haddii aad caddeyn ka sheegeysid qolka maxkamadda, muraayad ayaa loo dhaxeysiiyaa marka ma arkeysiid eedeysanaha. Waxaa kuu suurtogaleysa in aad aragtid dadka kale ee qolka maxkamadda kujira.



**Shaashad la'aan** Waxaad dooran kartaa in aad caddaynta ku bixisid sanduuqa markhaatiga oo uu aragtid qof walbo oo maxkamadda joogaa.

## Go’aanka maxkamadda iyo xukunka

Dhammaadkka maxkamadda, eedeysanaha waxaa lagu helayaa dambi ama dambi la'aan. (Dacwadaha qaarkood – tusaale, meesha guddiga xeer beegtida uusan go'aan ka gaarin – waxaa laga yaabaa in ay jirto dacwad kale.) Sababtoo ah qofka aan lagu helin dambi micnaheeda ma ahan in aan lagu aaminin. Dacwadaha waa arimo sharci iyo caddayn ah.

Hadii eedeysanaha aan lagu helin dambi, way fasaxanyihiin in ay baxaan. Tani waxay kugu noqon kartaa lama filaan iyo waalidkaaga iyo daryeelkaada laga yaabo in ay rabaan inaad kala hadasho lataliyaha dhibanaha maxkamadda ama shaqaalaha taageerada.

Haddii qof lagu helo dambi, waxaa laga yaabaa in la xukumo maalinta ama taariikhda ama taariikh ayaa loo diyaarinayaa oo dhageysiga xukunka ah.

### RAFCAANADA

Labbaduba dacwad oogaha iyo xad gudbuhuba waxay xaq u leeyihiin in ay racfaan ka qaataan go’aanka maxkmdadeed iyo xukunka. Tani macnaheedu waa maxkamadda sare ayaa dib u eegeyso dacwada markale. Haddii tani ay dhacdo, dacwad oogaha ayaa kula socodsiinaya nidaamka.

### XUKUMIDA

Garsooraha waa in uu eegaa waxyaabo badan marka uu xukumayo dambiilaha, sida xukunka loo siiyay dambiyada kale ee lamidka ah, warbixino ku saabsan dambiilaha, iyo warbixin kasta oo saameynta dhibanaha ah.

Haddii uu garsooraha ogolaado, adiga ama waalidkaaga ama daryeelaha waad akhrin kartaan qoraalka oo dhan ama qeybta warbixinta saameynta gudaha maxkamadda wakhtiga dhageysiga xukunka. Weydii lataliyaha dhibanaha maxkamaddaada ama sarkaalka booliska u xilsaaran in uu kuu weydiiyo garsooraha.

## Maxkamadda kadib

Marka lagu helo dambi, dambiile ayaa helayo dhoor xukun, sida xabsi, xukun bulsho ama ganaax.

### DIIWAANKA WERGALINTA DHIBANAHA

Haddii aad tahay dhibane dambi halis ah, waalidkaaga ama daryeelaha wuu ka diiwaangelin karaa diiwaanka ogeysiinta dhibanaha si aad u heshid xogta ku saabsan dambiilaha, sida meesha dacwada maxkamadda ay ka socoto, hadii dambiilaha si kumeelgaar ah looga siidaayo xabsiga iyo hadii dambiilaha lagu siidaayo cafis. Waxaad iska diiwaangelin kartaa naftaada marka aad gaartid 17.

Sarkaalka booliska u xilsaaran dawcada ayaa kaala hadlaya nidaamka. Faahfaahinta xiriirkaaga waa in uu ahaadaa ilaa taariiqda si looga helo warbixinta diiwaanka wargelinta dhibanaha.

## Xiriirada Muhiimka ah

Waxaa jira taageero laguu heli karayo xaalad kastoo aad ku jirto nidaamka cadaalada denbiilaha, iyo taageero gaara si lagaaga caawiyo sidii aad ula tacaali laheyd saamaynta denbiga.

Halkaan waa faahfaahinta xiriirka oo adeegyada muhiimka ah qaarkood ee dhibanayaasha iyo dadka dambiyadu saameeyeen. Waxaad ka heli kartaa xog dheeraad ah oo ku saabsan Khadka Macluuumaakda Dhibanayaasha ee 0800 650 654 (9am ilaa 6pm ka bilow Isniinta ilaa Jimcaha) ama adigoo booqanayo victimsinfo.govt.nz

**ACC**
acc.co.nz
Khadka-caawinta Sheegashada
0800 101 996
0800 735 566 Khadka-caawinta Cabashada Xasaasiga (dhibanayaasha xadgudubka galmada)

**La taliyaasha Dhibanaha Maxkamadda**
0800 650 654 Khadka Macluuumaakda Dhibanayaasha

**Waaxda Asluubta**
04 460 3000
corrections.govt.nz

**Guddiga Cafiska New Zealand**
0800 PAROLE (727 653)
paroleboard.govt.nz

**Taageerada Gaarka ah**
Eeg victimsinfo.govt.nz ama qeybta adeegyada caawinta gaarka ah ee buugga telefoonka

**Booliska**
Waxaad ka heli kartaa saldhiga booliska deegaanka police.govt.nz ama boggaga baluuga ah ee bilowga buugga telefoonka

**Taageerada Dhibanaha**
0800 VICTIM (842 846) 24 saacadood maalintiiba
victimsupport.org.nz

**Hoyga Qaxootiga Dumarka**
0800 REFUGE (733 843) 24 saacadood maalintiiba
womensrefuge.org.nz

**Khadka luuqada adeegyada turjumaada**
0800 656 656
9am–6pm Isniin–Jimco, 9am–2pm Sabti

---

## Qaamuuska

**Damaanada**
Marka booliis uu siidaayo qof lagu soo eedeeyay dambi oo xaalada ay aadeen maxkamadda.

**Lataliyaha dhibanaha maxkamadda**
Xubinta shaqaalaha Wasaarada Cadaadala kaas oo sharaxi kara nidaamka maxkamadda oo ku wargeliya dhibanayaasha nidaamka dacwadooda.

**Eedeysanaha**
Qofka lagu soo eedeeyay dambiga.

**Dilka**
Marka qof uu dilo qof kale.

**Dambiilaha**
Qofka lagu xukumay dambiga (Inta aan lagu helin dambiga, qofka lagu soo eedeeyay dambiga waxaa la dhahaa 'eedaysane').

**Cafiska**
Marka dambiile loo ogolaado ka bixitaanka xabsiga si loogu dhameeyo xukunkooda gudaha bulshadda. Waa in ay raacaan sharuudaha gaarka ah.

**Cadaalada heshiisiinta**
Cadaalada heshiisiinta waxay u ogolaaneysaa dhibanayaasha in ay u sheegaan dambiilaha sida ay u saameysay, hadal ka jeediyaan oo sida loo xalin lahaa waxyeelada, oo ay bilaabaan in ay xaliiyaan qaar ka mid ah saameynta dambiga. Kulan waxaa la yiraahdaa shirka cadaalada heshiisiinta.

**Dambiga halista ah**
- Dambiga dhaqanka galmada ama weerar kale oo halis ah.
- Dambiga sababay dhaawac halis ah ama dhimasho.
- Dambiga u hogaamiyay dhibanaha in uu lahaado cabsi joogta ah oo amnigooda ama amniga mid ama in kabadan oo xubnaha qoyskooda.


**Diiwaanka wergalinta Dhibanaha**
Liiska qarsoodiga ah ee ay isticmaalaan hay'ada cadaalada dambiga si loola socodsiiyo dhibanayaasha dambiilaha, sida meesha dacwada maxkamaddu ay mareyso, hadii ay jirto ka siideyn kumeel gaar ah oo xabsiga iyo marka dambiilaha lagu soo daayo cafis.

Ka diiwaangeli faahfaahintaada sarkaalka booliska oo masuul ka ah dacwada.

**Warbixinta saamaynta dhibanaha**
Diiwaanka sida dambigu uu usaameeyay dhibanaha. Warbixinta saameynta dhibanaha badanaaba waa qoraal, laakin ku dar sawiro, qoraalo ama gabayo. Garsooraha waa in uu tixgeliyaa iyadda marka la xukumayo dambiile. Dhibanaha wuxuu ku akhrin karaa qoraalka maxkamadda ka hor inta aan la xukumin.

## Qolka maxkamadda

Jaantuskan waxuu ku tusayaa hal tusaale oo ah qaabka qolka maxkamadda,iyo qofka aad arki karto.




1. **Garsooraha** ayaa masuul ka ah maxkamada. Waxay go'aansadaan haddii dambiilaha uu dambi leeyahay, ama haddii ay jirto xeer beegti, xeer beegtiga ayaa go'aan ka gaarayo midaan beddelkii.
2. **Diiwaan geliyuhu** wuxuu caawiyaa garsooraha iyo hubiyaa in nidaamyada maxkamadda in la raacay.
3. **Guddiga xeer beegida** waxay ka koobanyihiin 12 qof oo go'aansado haddii eedeysanaha uu dambiila yahay.
4. **Dacwad oogaha** ayaa qaada dacwada isagoo matalayo Dacwad oogaha oo soo bandhigaa dacwada ka soo horjeedo eedeysanaha.
5. **Warbaahinta** waa joornaaliistayaasha ka warbixiya dacwada.
6. **Qareenka eedeysanaha** wuxuu matalaaa eedeysanaha.
7. **Eedeysanaha** waa qofka lagu soo eedeeyay dambiga.
8. **Waardiyaha maxbuuska** wuxuu raacaa eedeysanaha.
9. **Fadhiga bulshadda** waa goobta xubnaha bulshadda iyo qoysaska dhibanayaasha iyo whānau meesha ay fariisan karaan, iyo meesha marqaatiyada ay fariisan karaan markii markhaati ay bixiyaan.
10. **La taliyaha dhibanaha maxkamadda** wuxuu ka caawiyaa markhaatiga fahamka nidaamka maxkamadda. Waxaa laga yaabaa in aysan marwalba ku jirin qolka maxkamadda.
11. **Markhaatiga qofka taageera** waa qofka uu garsoorahu ogolaaday in uu ku taageeri karo markhaatiga maxkamadda.
12. **Markhaatiga** wuxuu bixiyaa caddaynta ku saabsan waxa dhacay ama waxa ay ka ogyihiin dambiga.